

Sharciga 10^{ka} jannaayo 1962 lamba. 3.

Canshuur Dhaafka Dacwada Shaqada.

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

Markuu arkay oggolaanshaha Golaha Xeerdejinta;

WUXUU GUDDOONINAYAA, SOONA SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1

Codsiyada dacwadaha, jawaab-celinnaha iyo qoraallada kale, ee la xiriira dacwadaha (isqabadyada) shaqada, oo qiimaha waxa la isku haysta uu ka badan yahay Sh. So. 1.000, waxaa laga dhaafayaa canshuur nooc kasta oo ay tahay. Canshuur dhaafka waxa uu khuseeyaa xataa canshuurta diiwaangelinta xukunnada.

Qod. 2

Waxaa la baabiyeey wixii axkaam sharci ah oo aan la socon karin Sharcigan.

Qod. 3

Sharcigan waxa uu dhaqangelayaa maalinta shan iyo tobanaad, ee ka dambeysa nashrintiisa lagu nashriyo Faafinta Rasmiga, ee Jamhuuriyadda, waxaana lagu dabbaqayaa hawlaha (arrimaha) socda marka uu dhaqangelayo.

Sharcigan waxaa la gelinayaa Ururinta Rassmiga, ee Sharciyada, waxaana lagu nashrinayaa Faafinta Rasmiga.

Qof kasta waa ku khasab in uu dhowro sharcigan, inta kalana ku khasbo in ay u dhowraan sida sharci ay leedahay Soomaaliya.

Muqdisho, 10 Jannaayo 1962.

Aden Cabdulle Cusmaan

Wasiirka Kowaad

Cabdirashiid Cali Sharmarke

Wasiirka Arr. Diinta iyo Caddaaladda

Maxamuud Axmed Maxamed Caddaan

Wasiirka Maaliyadda

Cabdulqadir Maxamed Aden